

# Cudurka Meningokok

## Wargelinta Agaasika caafimaadka ee cudurka meningokok

Cudurka waxaa keena bakteeriyooyin la yidhaahdo meningokokker. Cudurku wuxuu u muuqdaa sida xangulle olol (meningitis) iyo dhiig sumaw, badanaa isku mar ah. Cudurka meningokok waa cudur marar dhif ah la arko . kala qaadista cudurku way yar tahay, marmar keli ah baana la arkaa wax ka badan xaalad qudh ah. Haseyeeshee cudurku waa halis, sidaas awgeed waa in la iska ilaaliyo. Badanaa marka goor hore la iska daweeyo ayaa si fiican looga bogsadaa.

Halkan ka akhri, sida cudurku u muuqdo, iyo sida la isaga ilaaliyo iyo sida la isaga daweeyo. Eeg sidoo kale bogga intarnetka [www.sst.dk](http://www.sst.dk) oo ka raadi "meningokoksygdom"

## Astaamaha cudurka

Cudurku wuxuu marka hore u eg yahay hargab. 1-2 cisho gudahood ayaa heerkulka jidhku kor ugu kacaa 38 - 40° C ama ka badan. Xummad ayaa si kedis ah kuugu soo boodda, waxaana raaca qadhqadhyo iyo kurbasho. Badi wuxuu leeyahay madaxwareer xoog ah, matag iyo abateed la'aan cuntada iyo cabitaanka la xiisayn waayo. Qofka bukaa wuxuu noqonayaa mid xoog u daallan (dheelalawsan) ama aan xisilloonayn, mid xoog u damqanaya ama xanaaqua foodda ka saaran yahay, ama mid aan la malayn karin.

Cudurka meningokok wuxuu keeni karaa maqaarka oo dhiig ku soo joogsado, oo ay ka muuqdaan baro ama haaro cas ama buluug iyo casaan ah. Xaaladaha qaarkood waxaa is gala qoorta iyo dhabarka, oo madaxa dhaqdhaqaajintiisa ayaa noqota mid adag oo xanuun badan.

Astaamaha cudurka ee carruurta dhalaanka ahi waxay noqon karaan kuwa nooc kale ah. Waxaa laga yaabaa in carruurtu noqdaan qaar firfircoondoodu hoosayso, cuntada iyo cabitaanka aan rabin, taabashada ka ooya, is dhaqaajin waaya oo mataga.

Cudurka Meningokok wuxuu kobci karaa saacado yar gudahood. Sidaas awgeed ayay muhiim u tahay in wax laga qabto, haddii xaaladda qofka bukaa ka darto.

## Dawaynta

Cudurka Meningokok waxaa lagu daweeyaa, iyadoo cusbataalka lagu jiifiyo. Badanaa waa laga bogsadaa cudurka, haddii dawaynta goor hore la bilaabo.

## Ku dhicitaanka

Danmark waxaa sannad walba lagu arkaa ilaa 100 xaaladood oo cudurka meningokok ah. Cudurku wuxuu sida badan ku dhacaa carruurta iyo dhallinyarada, haseyeeshee da' kasta wuu ku dhici karaa. Cudurka meningokok, had iyo jeer waxa uu ku dhacaa qof qudh ah, marmar baana mar la arkaa dhawr qof oo guri ku wada nool ama meel wada deggen oo uu mar ku wada dhacay.

## Xaaladda gudbinta

Cudurka meningokok waxaa laga qaadaa qoyaanka yar, ee ka dhasha qufaca iyo hindhisada. Qofku wuxuu xanuunka si lama filaan ah uga qaadaa, cudurside caafimaad qaba, isagoon ka qaadin qof qaba cudurka meningokok.

Waxaa jirta halis yar oo agagaarka qofka cudurka qaba, muddo dabadeed cudurku ku kobco, siiba bilawga. Taasi waxay gaar u tahay haddii guri la wada deggan yahay, mararka qaarkoodna waxay sidoo kale saamaysaa xarumaha dharaartii la tago, fasallada dugsiyada iwm.

Jidhka debeddiisa, bakteeriyyadu muddo dheer kuma noolaan karto oo markiiba way dhimataa.

Cudurka la isugu ma gudbiyo cuntada. Mana jirto sabab si gaar ah loogu nadiifiyo qalabka carruurtu ku ciyaarto (legetøj) iyo qolalka carruurtu.

### Ka hortagista

Aad ayay muhiim u tahay, in isha lagu hayo astaamaha cudurka, oo la waco dhakhtar isla marka laga shakiyaba cudurka meningokok.

Marka cidi qaaddo cudurka meningokok, waxaa dadka ku xeeran, oo badanaa ah kuwa meel kula nool, la siiyaa dawo ka hortegiseed oo antibiotek ah. Waxay tani dhacdaa ka dib markay isku afgartaan dhakhtarka gacanta kugu haya iyo dhakhtarka xaruntu. Sida badan waxaa la`sa siiyaa hal xabbo oo kiniin ah. Inkasta oo dawaynta ka hortegista ahi si fiican u shaqayso, si buuxda cudurka kaaga ma wada ilaalin karto, markaas oo ay suurtagal tahay inaad qaaddo. Sidaas awgeed waa in qofku weli isha ku hayo astaamaha cudurka.

### Tallaalka

Xaaladaha ugu badan ee cudurka meningokok waxaa keena nooc bakteeriya aan la tallaali karin. Haseyeeshee xaaladaha qaarkood ayuu suurtagal yahay tallaalku. Dhakhtarka dawladda ee xarunta ayaa xilqaada, cidda la tallaalayo. Badi waa dadka qaatay dawaynta ka hortegidda ah ee antibioteka.

Tallaalku wuxuu si fiican wax u difaacaa 5-6 cisho ka dib, laakiin waa marka lagaa tallaalo keliya nooca meningokok. Difaaca tallaalku wuxuu tamargabaa dhawr sano dabadood.

### Muhiim

Tallaabada ugu muhiimsan ee cudurka lagaga hortagi karaa waa in isha lagu hayo astaamaha cudurka, oo lala xidhiidho dhakhtarka marka ugu horraysa ee shakiga ugu yar lagu tuhmo inuu agagaarka ku jiro cudurka meningokok.

**Haddii aan markiiba lala xidhiidhi karin dhakhtarka, waa in ama la waco ambalaaska (ambulance – tlf. 112) ama ilmaha toos loo geeyo cusbataalka.**

Faahfaahin dheeraad waxaa laga heli karaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka dawladda ee xarunta.

Kategori: Orientering - Udgivelsesdato: 16. april 2008